

Maansada: Yaacdo dhega xiran Curiye: Abwaan Maxamad Xuseen Faarax



Maansada: Yaacdo dhega xiran Ciisow ya'leeydii Yalka iyo dabeyshiyo Yayeentii war qaadkiyo Ii keenyey yaaru. Ha yeeshee, yabaalkiyo Yalanyoolka nagu dhacay Waa ammuur la yaablehe Anna yeled faallada Aan warbixin yulyuliyee Dhug u yeelo maansada. Siyaasiyiintan yeeydaa Yamaahuur yugyugadaa Kulligood yuxuushtaa Maxay yihiin haddaa tiri Yamaanyugga silloon iyo Waa yabaro qaab daran Wacdi loo yaboohiyo Waanada ma yeelaan Eheb ku ma yalmanayaan Waa yaacdo dhega xiran Waa yabaaq aqoondaran Waa yaahi gacan maran Yalaalugada ceebtiyo Waxa laga xayaxo iyo Inta laga yaqsoodiyo Yaahuudey ku faanaan. Yoolka ay higsanayaan Maahan yu'ashadoodee Waa wax duul u yeeriyo Kii dambo yimaadana Ka dhibaato yeel badan Yamaanyuugyadii hore. Waase yeelkadoodiyo Caqli yaabiskoodee Aan u boxo ya'dii kale Yabacsanida shacabkaan. Ma yaaceen dadkeygii Abwaan waxaa lagaa yiri Doqonnimo yahoom iyo Yebel baa haraysoo Yahay iyo waheey iyo Yuuska cabasho mooyee Ma yadaan cadaawaha Yibirtaan cuneeysee Yatiimeysay gebigood Yac iska ma dhahaanoo Yasmadaan ku raagtiyo Sidaan loo yamuudana Ka ma yara caroodaan Yuxda beenta mooyee Yaqiin ka ma hadlaayaan Qabiil yuucid mooyee Qaran yoban maayaan Colaad yaawtan mooyee Yusri nabad ma doonaan Yulqan muranka mooyee Yiraah ku ma heshiiyaan Yuu'da gocasho mooyee Yagleel sabar ma qaataan Sida koro yucubbeey Kala yeer dhawaaqaan. Yoomqura dhulkoodana Yaanbada ma geliyaan Abuur ku ma yub siiyaan Qayraadka wada yaal Ma yuubyuub gurtaanoo Yadahooda ma maalaan Yuu'enkiyo shisheeyee Wax la soo yalqiyeey iyo Yaqfureyn ka dhowrtaan. Yar iyo wayna gebigood Yixdu keey ku taalliyo Duqa yalal caddaagaa Dalkoodaan yalaaliman Yurub bey ka jecelyihiin. Ya'da ka ma dambeystaa Yuruuracada soomaal Qatar yoomayoomiyo Yamays hoos u qodan iyo Af yaxaas dhexdiis bey Maanta wada yaxoobtaa Yaduunbeyna huwataa Yuurarbey ku huruddaa Yuclulbey ku toostaa Yaadbey ku nooshahay Yuuqyuuqsi baa diley Iyo yulugle meermeer. Qiyaas yaahinteydana Yasirka ALLE mooyee Wax u soo yir naasa cad Waa yallah ha suginina.**Dhammaan. Abwaan Maxamad Xuseen Faarax**